JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA NOOTAAYAHA & LATALINTA
ARRIMAHA SHARCIGA EE TAYO
MUQDISHO - SOOMAALIYA

TAYO PUBLIC NOTARY
MOGADISHU-SOMALIA

جمهـــورية الصومـــال الفدراليـــة
مـــكتب تيو لتوثيـــق العقـــود
والإستشـــارات الشرعيـــة
مقديشـــوا ـ الصومـــال

# SHARCIGA DHISMAHA SHIRKADDA

# ENVIROSOM MANAGEMENT AND CONSULTANCY SERVICES

ENVIROSOM
ISO CERTIFICATION & ENVIRONMENTAL

MUQDISHO-SOOMAALIYA

2025

**UJEEDO:-DHISID SHIRKADDA ENVIROSOM MANAGEMENT AND CONSULTANCY SERVICES**

**Muqdisho:** Maanta oo ay taariikhdu tahay **16/11/2025**, anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, ahna Nootaayaha Tayo, xafiisna ku leh Suuqa Bakaaraha, Dhinaca Galbeed Ee Daarta Maalin Taajir Ee Magaalada Muqdisho, Waxaa Xafiiska Iigu Yimid Mudanaha Hoos Ku Xusan:-

**1-**AHMED MOHAMED NOOR, ina Batulo Hassan Mohamed,Somali ah, Sita Somali Passportr Lr:P01738135.

Mudanaha kor ku xusan Isago caafimaad Qaba, Caqligiisuna Taam Yahay, Cid Heshiiskaan ku Qasabtayna Aysan Jirin Qowl Iyo Ficilba, Wuxuu i weeydistay inaan u Qoro Heshiis Ku Saabsan Dhismo Sharci Shirkadeed oo ka Kooban Qodobada Hoos ku Qoran:-

**QODOBKA 1-AAD**

**MAGACA IYO ASTAANTA SHIRKADDA**

MAGACA SHIRKADDA WAA ENVIROSOM MANAGEMENT AND CONSULTANCY SERVICES.

ENVIROSOM
ISO CERTIFICATION & ENVIRONMENTAL

**QODOBKA 2-AAD**

**WAQTIGA LA AASAASAY SHIRKADDA**

Shirkadda Envirosom Management And Consultancy Services, Waxaa la aas'aasay **01-11-2025** Waxaana lagu aas'aasay Magaalada Muqdisho Ee Caasimadda Soomaaliya.

**QODOBKA 3-AAD**

**XARUNTA SHIRKADDA**

Xarunta Shirkadda **ENVIROSOM MANAGEMENT AND CONSULTANCY SERVICES**, Waxay Ku Taala Magaalada Muqdisho Ee Caasimadda Soomaaliya, Waxayna Xafiisyo Iyo Laamo Ku Yeelan kartaa Dhammaan Dalka Gudihiisa Iyo Dibaddiisaba.

**QODOBKA 4-AAD**

**NOOCA SHIRKADDA.**

Shirkaddani Waa Shirkad Saamileyda Oo Dhan Ay U Wada Furantahay In Ay Ku Soo Biiraan (Partnership, Corporation) Haddaba Saamile Kaste Waxuu Mas'uul Ka Yahay Hatidiisa Ku Jirto Shirkadda Inta Ay Dhantahay.

## QODOBKA 5-AAD
## UJEEDADA SHIRKADDA

- La-Talin Iyo Maaraynta Deegaanka.
- La-Talin Ku Saabsan Cilmiga Dhulka (Geosciences).
- La- Talinta Adeegyada La Xiriira Badda Iyo Xeebaha.
- Maaraynta Biyaha, Isbeddelka Cimilada, Iyo Tamarta Nadiifka Ah.
- Qiimeynta Saameynta Deegaanka (EIA).
- Gudashada Howl Kasta Oo La Xiriirta Maal Gelinta Dalka.
- Abuuridda Dakhli Cusub Oo Wax Looga Qabanayo Shaqa La'aanta Dalka Ku Baahsan
- Fulinta Mashaaricda Maalgelinta La Xiriirta Iyo Hormarinta Dalka
- Keenida Farsamo Cusub Oo Ku Haboon Duruufaha Dalka.
- In Ay Qayb Wayn Ka Qaadato Dhisidda Dhaqaalaha Iyo Horumarka Bulshada Somaliyeed
- In Ay Abuurto Ila Dhaqaale Iyo Adeegyo Ay Ka Faa'idaystaan Bulshada Soomaaliyedd Qeybaheeda Kala Duwan.

## QODOBKA 6-AAD
## RA'SUMAALKA SHIRKADDA.

Raa'sumaalka Shirkadda waa **$30,000** ( Sodon Kun Oo Dollarka Oo Lacagta Maraynkan ah), Waxaana ku Talagalka Shirkaddu yahay in Raa'sumaalka shirkadda la kordhiyo ayada oo loo marayo in sheerer loo furo maalgashadayaasha Cusub.

| NO | MAGACA | SAAMIGA | BOQOLKIBA |
|---|---|---|---|
| 1 | AHMED MOHAMED NOOR | **$ 30,000** | **100 %** |
| | **TOTALE** | **$ 30,000** | **100 %** |

## QODOBKA 7-AAD
## GUDDOONKA SHIRKADDA

Gudoomiyaha Shirkadda Waa Mudane **AHMED MOHAMED NOOR**, Wuxuu Awood Buuxda u Lee yahay Tasarufka Shirkadda Sida in uu Maamuli Karo Shirkadda **ENVIROSOM MANAGEMENT AND CONSULTANCY SERVICES,** Sidoo kale Wuxuu Shirkadda Magaceeda Ku Furi kara Akoono Bankinyada Dalka iyo Dibadaba, uuna La Macaamili karo Shirkadaha Dalka iyo Dibadaba iyo Hay'adaha Dowliga ah Iyo Kuwa Aan Dowliga Aheynba Oo Ay Dani Ugu Jirto shirkadda,

## QODOBKA 8-AAD
## TIRADA DADKA AAS'AASAYAASHA AH

- Shirkaddu waxaa leh Hal Ka Qof ee sare ku xusan.
- Maamulka sare ee shirkadda (Board of Directors), waxaa uu ka kooban yahay Hal xubin oo ah Maamulaha Shirkadda, waana hay'adda ugu sareysa shirkadda, isaga ayaana dooranaya xubnaha fulinta (Executive Officers) ee wadaya howl maalmeedka shirkadda.
- Xeer hoosaadka shirkadda ayaa lagu cadeynayaa awoodaha howl wadeenada fulinta waxaana soo saaraya xeer hoosadyada aas'aasaha shirkadda, Waxa ayna xeerhoosaadyadu hoos imaanayaan xeerka guud ee shirkadda.

## QODOBKA 9-AAD
## BUUGGA HANTIDA SAAMILEYDA

Buugga hantida saamileyda waxaa ku cad qodobada soo socda:

- Inta uu la'eg yahay qiimaha saami kasta, inta saami uu leeyahay xubinkasta, magaciisa/magaceeda, xaddiga uu u dhiibay, taariikhda la dhiibay, lambarka boonada loo jaray, iyo dhamman warbixinadiisa oo tifatiran.
- Buuggaas waxaa keydinaya xoghayaha maamulka shirkadda.
- Waxaa saxiixaya maamulka shirkadda marka la dhameystiro caddeymaha saamiga iyo saamilaha.
- Saamilaha waxaa la siinayaa shahaado caddeyneysa saamigiisa, waxaana saxiixaya maamulka shirkadda.

## QODOBKA 10-AAD
## KORDHINTA IYO DHIMIDDA RA'SUMAALKA SHIRKADDA

- Maaliyadda shirkadda waa la kordhin kara, waana la dhimi karaa, haddii ay sidaas isku raacaan xubnaha shirkadda lana waafajiyo sharciga shirkadda.

## QODOBKA 11-AAD
## IIBINTA SAAMI

Xubin Kasta Waxay Iibin Kartaa Saamigeeda Ay Ku Leedahay Shirkadda, Waxaana Mudnaanta La Wareegidda Koowaad Leh Xubnaha Shirkadda, Haddii Muddo Hal Bil Ah La Waayo Xubin Ka Mid Ah Shirkadda Oo La Wareegta Saamiga La Iibinayo Saamiluhu Waxaa Uu Xaq U Leeyahay Inuu Ciddii Dalbaneysa Oo Aan Wadanka Danbi Ka Galin Ka Iibiyo Kadib Marka Ay Aqbalaan Qofkaas Gudiga Sare Ee Aas'aasayaasha.

## QODOBKA 12-AAD
## XUBINTII GEERIYOOTA

Xubinta geeriyoota oo ka mid ah hantilayaasha shirkadda waxaa saamigiisa xaq u yeelanaya dhaxaltooyadiisa sharciga ah, oo ay soo caddeyso maxkamad, kadib waxay soo magacaabanayaan wakiil haddii ay ogolaadaan in shirkadda ay kasii mid ahaadaan, sidoo kale haddii ay dalbadaan in saamigooda la baxaan sanadka xisaabeedka markii uu dhamaado ayaa loo bixinayaa saamigooda.

## QODOBKA 13-AAD
## ILAHA MAALGALINTA SHIRKADDA

Ilaha maalgelinta Shirkadda waa maalgelinta saamileyda, iyo Deymaha waafaqsan Shareecada Islaamka.

## QODOBKA 14-AAD
## XISAABTA SHIRKADDA

1- Xisaab xirka shirkadda :- xisaabta shirkadda waxaa la xirayaa 3 Biloodba ee sanadkasta.
2- Zekada:- xisaab xirka ka dib, inta aan la qeybin faa'idada iyo khasaaraha waxaa laga bixinayaa zekada ku waajibtay hantida shirkadda waxaana masuulideeda leh maamulka shirkadda (executive director).
3- Qeybsiga faa'idada iyo khasaaraha:- qeybsiga faa'idada iyo khasaaraha waxaa lagu jaangoynayaa saamiga ay xubin kasta ku leedahay hantida shirkadda. Waxaana la qeybinayaa 31 janaayo.

## QODOBKA 15-AAD
## SHARUUDAHA KA MID NOQOSHADA

Qofka xubin rasmi ah ka noqon kara shirkadda:-

- Waa inuu ogolaansho ka haystaa shirkadda si uu uga mid noqdo saamileyda.
- Waa inuu dhiiba saamiga u xadidan shirkadda oo dhamaystiran.
- Waa in uu ogolaado, saxiixana xeerka shirkadda.
- Waa in uuna dalka ka galin fal dambiyeed ama ficilo wax u dhimaaya sumcada qofka

## QODOBKA 16-AAD
## LUMINTA XUBINNIMADA

- Inuu qoraal ku soo codsado ka bixidda saamileyda shirkadda.
- Haddii uu ku xadgudbo xeerka iyo nidaamka u degsan shirkadda.
- Haddii ay ku caddaato inuu ku takri falay hantida ama magaca shirkadda.
- Xubintii lumisa ka mid noqoshada saamileyda waxaa loo celinayaa xaquuqdiisa faa'ido iyo khasaaro waqtiga xisaab xirka.

## QODOBKA 17- AAD
## MUDADA JIRITAANKA SHIRKADDA.

Mudada Jiritaanka Shirkadda waa 100 Sano.

## QODOBKA 18- AAD
## BAABI'IDDA SHIRKADDA

Shirkadda waxay ku baabi'i kartaa marka ay timaado xaladaha hoos ku xusan:-

1. Haddii ay dhammaan xubnaha shirkadda isku raacaan baabi'inta shirkadda.
2. Haddii uu burbur ku yimaado dhammaan hantida shirkadda.
3. Haddii ay soo wajahdo hoos u dhac maaliyadeed ayna weydo kabidda saamileyda.
4. Haddii uu soo baxo sharci baabi'iniya Shirkaddaha nuucaan ah.

## QODOBKA 19-AAD
## HABKA UU KU DHACAYO BAABI'IDA SHIRKADDA

Baabi'idda shirkadda waxaa uu ku dhacayaa sida soo socota:-

1. Diyaarinta heerka maaliyadeed ee shirkadda.
2. Bixinta daymaha shirkadda lagu leeyahay.
3. Khasaaraha wuxuu ahaanaya hadba inta boqolkiiba uu saamigiisu la'eg yahay qofka.

## QODOBKA 20-AAD
## FADHIYADA SAAMILEYDA

Fadhiyada saamileyda waxay u dhacayaan sida soo socota:-

1. Kulamada caadiga ah ee saamileyda waxay dhacayaan bishiiba mar.
2. Kulamada aan caadiga ahayn, gudoomiyaha waxaa uu iskugu yeeri karaa kulamo deg deg ah haddii loo baahdo, sidoo kale haddii ay isku raacaan xubnaha shirkadda.

4- Xubin walba waxay xaq u leedahay in la soo gaarsiiyo ogeysiis kulanka caadiga ah muddo bil ka hor

## QODOBKA 21-AAD
## CODKA SAAMILEEYDA

Codka saamileyda shirkadda waxaa loo raacayaa laguna qaadanayaa hal-dheeri haddii ay isla ekaadaan oo ay is garab dhacaan xubnaha shirkadda ee wax dooranaya waxaa loo raacayaa dhinaca guddoomiyuhu la jiro taas oo noqoneysa aqlabiyadda saxda ah.

## QODOBKA 22-AAD
## GUDOOMINTA SHIRARKA

Shirarka kala duwan ee shirkadda, waxaa shir gudoominaya gudoomiyaha shirkadda, haddii uu maqan yahay gudoomiyaha, waxaa shirarka gudoominaya ku xigeenkiisa ama Xoghayaha Shirkadda iyo cidii kale oo si qoraal ah ugu wakiisho gudoomiyaha marka lawaayo ku xigeenkiisa iyo madaxa xisaabedka Shirkadda.

## QODOBKA 23-AAD
## WAXYAABAHA AAN LAGU XUSIN XEERKAN

Dhammaan waxaa aan lagu sheegin xeerkan waxaa loola noqonaya sharciga islaamka qeybta mucaamalaadka iyo Shirkaddaha, sidoo kale qawaaniinta dalka u degsan.
F.g wixii shareecada islaamka ka hor imaanaya waa waxba kama jiraan.

## QODOBKA 24-AAD
## ISTICMAALIDDA MAGACA SHIRKADDA

Magaca shirkadda ayaa loo isticmaalayaa dhammaan hantida shirkadda sida: guryaha, dhulalka, gaadiidka, bank account, heshiisyadda, tiimbarayaasha iwm.

## QODOBKA 25
## HESHIISKAN WUXUU KA KOOBAN YAHAY
## 25 QODOB 1 COVER , 6 BOG IYO 2 NUQUL OO ORJINAAL IYO KOOBI AH.

**SAXIIXA MILKIILAHA**

1- AHMED MOHAMED NOOR ____________________

**(XAFIISKA NOOTAAYAHA )**

**Rep.1957/T.P.N/2025, Tr.16/11/2025,** Anigoo ah Nootaayaha Tayo, **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"** waxaan caddeynayaa in saxiixa sare Xusan Uu Yahay kii runta ahaa **1- AHMED MOHAMED NOOR** (Milkiilaha Shirkadda), Mudanahan kor ku xusan, oo anigu aqoonsadey hubiyeyna in magacaas uu leeyahay Waxay Dhismahan Shirkadeed igula saxiixay Xafiiska isaga oo xis qaba raalina ah, Caafimaad qaba, Xiskiisuna taam yahay, Cid khasbeysana aysan jirin, Waana Dhismo Shirkadeed ansax ah oo Waafaqsan Shareecada Islaamka.

**NOOTAAYAHA**

By Shaxane **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**

XAFIISKA NOOTAAYAHA TAYO PUBLIC NOTARY DR. MAXAMED C/LLAAHI MAXAMED "MAX'ED NOOTAYO"

FIIRO GAAR AH / OBSERVATIONS

Saxiixa qofka baasaboorka leh توقيع حامل الجواز Signature of passport holder

JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA — SOMALI REPUBLIC

BAASABOOR جواز سفر PASSPORT

Nooca/ النوع /Type: P

Astaanta Dalka/ رمز البلد /Country Code: SOM

P01738135



Magaca/ الاسم /Name: AHMED MOHAMED NOOR

Magaca Hooyada/ اسم الأم /Mother's Name: BATULO HASSAN MOHAMED

NID: 26802156490036

Jinsiyada/ الجنسية /Nationality: SOMALI

Shaqada/ المهنة /Occupation: LABOURER

Taariikhda Dhalashada/ تاريخ الميلاد /Date of Birth: 15 Feb 1968

Meesha laga Bixiyey/ مكان الاصدار /Place of Issue: MOGADISHU

Lab Dheddig/ الجنس /Gender: MALE

Meesha Dhalashada/ مكان الميلاد /Place of Birth: MOGADISHU

Taariikhda la Bixiyey/ تاريخ الاصدار /Date of Issue: 31 Aug 2025

Xafiiska laga Bixiyey/ جهة الاصدار /Issuing Authority: SOMALI GOVERNMENT

Taariikhda ul Dhacayo/ تاريخ الانتهاء /Date of Expiry: 30 Aug 2030

Saxiixa Qofka/ توقيع حامل الجواز /Holder's Signature

XAFIISKA NOOTAAYAHA — YAYO PUBLIC NOTARY — C/LAAHI MAXAMED

P<SOMNOOR<<AHMED<MOHAMED<<<<<<<<<<<<<<<<<<<<<<<<

P017381353SOM6802158M3008306268021564900366 6

## FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

**Tr. 16/11/2025**

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Axmed Maxamed Nuur** oo ka Wakiil ah Dhinaca 2aad **Shirkadda Envirosom** Dukumiintiga **Original** Heshiiska **Rep No. 1957/T.P.N/25, Tr. 16/11/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

| | |
|---|---|
| **Magaca Dhinaca 2aad** | Shirkadda Envirosom |
| **Taariikhda Heshiiska** | 16/11/2025 |

**Wakiilka Dhinaca 2aad:** Aniga oo ah **Axmed Maxamed Nuur**, Leh Tel No. **+44 7380 104440**, Degan **MUQDISHO** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Heshiiska faah faahintiisu Sare ku cadahay uuna leeyahay **Shirkadda Envirosom**.

Sawir

**SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA**

**Maxamed Cabdi Cali**

______________________

**SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA**

**Axmed Maxamed Nuur**

______________________

16/11/2025